

DHAQAMADA OO DHAN AYEY KA DHACDAA RABSHADA GALMADU

Dumarka dalalka aan afka ingiriiska ku hadlin waxay la kulmaan xanibaadyo xagga luqada iyo dhaqankaba ah sida qayb nolol maalmedkoda ka mid ah.

Kuwa ku soo dhibaatooday rabshada galmada waxay la kulmaan xanibaadyo dheeraad ah oo aamus ah iyo macluumaad iyo caawimo la'aan.

Boqolkiiba 90% ayaa ku dhibaatooda u galmoodka xoogga ah dumarka iyo carruurta.

Galmada xoogga ahi badideedu waxay ka dhacdaa guriga dhexdiisa.

XAQ AYUU U LEEYAHAY QOF KASTAA

- In uu dareemo amaan
- In la rumeysto
- In la dhegeysto
- In loo ogolaado wakhtiga iyo goobta si ay u gaadhaan go'aamadooda ku saabsan sidii ay ula macaamili lahaayeen dhacdadaas.

WAA MAXAY GALMOODKA XOOGGA AHI

Ugalmoodka xooga ahi wuxuu ka soo horjeedaa sharciga.

Raadka u galmoodka xoogga ahi waa mid weyn. Badannaana wuxuu keenaa dhibaatooyin wakhti dheer oo maskax iyo jidhba leh.

U galmoodka xooga ah waxaa ku jira:

- ***Galmo aan raali laga ahayn***
- ***U galmoodka qof aadan geyin***
- ***Buuq iyo qaylada galmada***
- ***Buuq iyo qaylada galmada***
- ***Kufsig***
- ***Waxyeelada xafladaha***

Galmada aan raaliga laga ahayn

Ka raali ahaanshaha micnihiisu waa mid xor ah oo ah heshiis ikhtiyaari ah. Sharcigu wuxuu tixgelinayaa xaqiiqda inay qofka dumarka ahi u muuqan karto qof raali ka ah ama ay isku dhiibto xaaladaha qaarkood. Qofka dumarka ah waa la qabaa uun ma aha in loo galmoodo raali ka ahaanshaheeda la'aantiis

Rabshada iyo qaylada galmada

Ujeedo galmo kasta oo aan la doonayn- oo ay ku jirto gacan ku dhufasho aan la dooneyn ama taabasho, ceebeyn iyo faalo ku saabsan qofka jidhkiiska, muuqaalkiisa ama noloshiisa gaarka ah, bandhiga ama muujinta qalabka gaf ama danbi ah.

U galmoodka qof aan la geyin

Falalka galmada ee lagu khasbo qofka da'da yar/ilmaha uu ku khasbo qof kasta oo ka mid ah qoyskooda ama qoyska balaaran, oo uu ku jiro aabuhu, adeerku, wallaalku, awoowga, ama wiilka abtiga ama adeerka loo yahay, ama qof ilmaha xannaaneeya sida aayo/adeer, gashaanka ama waaliidka korsaday.

Galmada Fara xumeynta ilmaha

Falalka galmada ee lagu sameeyo carruurta da'doodu tahay ilaa 17 jir dad aan ahayn xubnaha qoyska. Falalkan waxaa ku jiri kara galmo (wasmo), farta ama shey la geliyo, Siigeysi khasab ah, u fiirsasho galmo ama si baqdin leh, dhunkasho (shumin), taabasho ama la ciyaarid.

Kufsig

Sharci ahaan kufsig micnihiisu waa in isutegid ama dabada ka raali ahaansho la'aan. Kufsig wuxuu micnihiisu yahay sidoo kale gelinta qayb kale oo jidhka ka mid ah ama shey kale iyo galmada afka oo khasab ah. Taasna waxaa lagu qeexaa waxyeelada galmada sharci ahaan. Kufsigu wuxuu ku saabsan yahay xoog iyo kontoroolid kuma saabsana galmo.

Waxyeelada xafladaha

Waxaa weeyaan hab naxariis daro ah oo loo waxyeeleeyo carruurta, dhalinta soo kacaysa iyo dadka waaweyn. Oo isugu jirta mid jidheed, galmo, iyo waxyeelo nafsadeed oo ku lug leh isticmaalka xafladahaas. Waxyeeladaas xafladuhu sida badan waxay wadataa waxyeelo la soo celceliyeyo ilaa wakhti dheer.

BARNAAMIJKA WAXYEELADA GALMADA EE IWSS WUXUU U QABTAA...

Bulshooyinka aan afka ingiriiska ku hadlin

- waxbarashada bulshada iyo macluumaad ku saabsan waxyeelada galmada, adeegyada iyo shuruucda khuseysa... *Hadalo, siminaaro, warqadaha xaqiiqda, macluumaadka talefoonka ah.*

U adeegayaasha adeega waxyeelada

galmada - Ilo akhbaareed, horumarin adeeg iyo tababaro si loo horumariyo dumarka aan afka ingiriiska ku hadlin helitaanka adeegyada...

Fadhiyo tababar iyo macluumaad lagu horumarinayo helitaanka iyo sinaanta adeegyada dumarka u galmoodka wax loogu geystay.

Dumarka- haddii aadan ingiriiska ku hadlin

oo wax laguugu geystay galmood...

U doodid iyo caafimaad ku taageerid iyo adeegyada la talinta iyadoo la marayo habka sharciga ah haddii aad doorato in aad sheegto waxyeelada galmada.

Queensland Health provided funding to the Immigrant Women's Support Service Sexual Assault Program for development of this leaflet. The Justice and Attorney-General Department funded the printing.

We acknowledge the many different sources which assisted in the development of this leaflet.